

Bayaanka Saameynta Sinaanta: BPS Qorshaha Siyaasada Adeegyada Maktabada SY 2022-26

Ciwaanka: BPS Qorshaha Siyaasada Adeegyada Maktabada SY 22-26

Taariikhda: Ogos 5, 2021

Magaca siyaasada, sameynta qorshaha, barnaamijka, ama go'aanka miisaaniyada ee tixgalinta

Miyaa [Qalabka Qorsheynta Sinaanta](#) la isticmaalay? Haa Maya

Haddii haa tahay, gali taariikhda (aha) kulamada REPT iyo linkiga dhameyska REPT halkan: Socda

Miyaa xubin ka tirsan Qeybta Sinaanta, Siyaasada iyo Farqiga Fursaduhu dibu eegay bayaankan? X Haa Maya

BPS Qeybaha Qalabka Qorsheynta Sinaanta Isirka	Nuxurka/Sababta
<p>1. Soo-jeedinta/Soobandhigista & Saameynta <i>Waa maxay natijoooyinka soojeedinta/dadaalada la rabo, oo ay ku jiraan baabinta kala duwanaanshaha? Yaa hogaaminaayey shaqadan/qorsheyntan, oo miyey ka turjumayaan aqoonsiga kooxda ardeyga iyo qoyska BPS (kooxaha muhiimka ah oo ay ku jiraan shakhsiyaadka Madow, Latinx, Eeshiyaanka, dhaladka, muhaajiriinta, luuqadaha badan ku hadla, iyo khibradaha Waxbarashada Gaarka ah)?</i></p>	<p>Hadafka: Qorshaha Siyaasada Adeegyada Maktabada BPS ee SY 2022-26 (LSSP22) waxa loogu talo galay in lagu siiyo dhamaan ardeyda helitaan loo siman yahay oo barnaamijyada maktabada dugsiga oo leh macalimiin khabaro ah; maalgalin ku filan dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan ilaalinaya (CLSP) kayd dhamaan qaabkasta; iyo badqab, goobo soojiidasho leh dhamaan deeqaha waxbarasho iyo ka qeybnoqoshada saxda ah. Inta lagu jiro sanadka koobaad ee qorshaha <i>Kaydka Xogta Maktabada</i>, ayaa la diyaarin doonaa lana hirgalin doonaa sanadaha ku xiga si loo kordhiyo, dhiso oo ilaaliyo khayraadka ardeyda baahiya badan.</p> <p>Natijoooyinka Gudaha/Dibada</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Horumarinta dhamaan ardeyda (gaar ahaan Madowga, Latinx, Eeshiyaanka, Bartayaasha Ingiriisida, iyo ardeyda Waxbarashada Gaarka ah) barashada iyo fahamka culuumta ee: <ul style="list-style-type: none"> ▪ Kordhinta codka ardeyga iyadoo la maraayo helitaan dhaqan ahaan iyo luuqad ahaanba dhowraya kaydka maktabada si kor loogu qaado rabitaanka ardeyda, dooda iyo ku luglahaansha. ▪ Siinta macluumaad saxa oo Akhriska iyo Qoraalka oo kordhinaaya horumarka awoodaha ku saleysan Ururka Mareykanka ee Maktabadaha Dugsiyada (AASL) Nidaamyada (2018) Qaabka Waxbarashada Ardeyga. Barashada Baadhista, ardeydu waxay sameynayaan su'aalhooda khuseeya arin ama mawduuc ay xiisaynayaan iyo, iyagoo tilmaam wada shaqeyn ka helaaya macalinka maktabada iyo macalimiintooda, isticmaalayaan khayraadka buuxinaaya baahiyahooda siyad uga jawaabaan su'aalaha iyo soo jeedinta waxbarashada. ● Baabinta farqiga fursadaha, iyo horumarinta waxqabadka guud ee ardeyga. ● Hirgalinta waxbarashada shaqaalaha maktabada/macalinka oo ay ku jiraan Nashqadayn Baadhis si loo caawiyo dadaalka wax looga qabanaya farqiga fursadaha ardeyga. ● Sii wad falanqeynta helitaanka qoraalada dhaqan ahaan iyo luuqad ahaanba haboon, oo horumari kala nidaamka baadhista kala duwanaanshaha kaydka maktabada adoo isticmaalaya nidaamkyada sayniska maktabada ee cusub. <p>Kooxda Latalinta:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● Waxa jiray 15 xubnood oo LSSP Kooxda Latalinta oo ay ku jiraan 11 dumar ah iyo 4 rag ah; 11 waa Cadaan iyo 4 Midab ah. ● Kooxda Maktabada BPS waxay isticmaashay Qalabka Qorsheynta Sinaanta Isirka (REPT) si loo sameeyo iswaafaqsanaan qorshaha helitaanka ardeyga ee

	<p>maktabada. Kooxdani waxa ku jira 1 qof oo ah Eeshiyaan, 11 Madow, 4 Latinx iyo 33 Cadaan ah.</p>
<p>2. Waafaqsanaanta Qorshaha Siyaasada <i>Sideebaa soo-jeedinta/dadaalku u waafaqsan yahay qorshaha siyaasada degmada?</i></p>	<p>LSSP22 waxay ku daraysaa shuruucda Qorshaha Siyaasada ee Boston Public Schools 2020-25, oo dhigaaya “helitaan loo siman yahay oo waxbarashada sare ardey kastoo fasalka ah” (p. 6).</p> <p>Lixda Dadaal ee Qorshaha Siyaasada iyo hadafyada la xiriira waxay dejiyeen tilmaamaha hadafyada LSSP22, cabirada iyo natiijooyinka. Tusaale, Hadafka 1.1B ee Qorshaha Siyaasada Adeegyada Maktabada ee 2022-26 BPS, “Samee oo hirgali miisaaniyada qofkiiba xadiga CLSP buugta maktabada dugsiga, khayraadka iyo qalabka ay maamulayaan shaqaalaha maktabada dugsiga” oo waafaqsan Hadafka 1 ee Qorshaha BPS, oo “Hubinaya in siyaasadaha BPS, qorshayaasha iyo miisaaniyadu kor u qaadayaan Fursadaha iyo Guusha dhanka farqiga si dugsiyadeena si siman loo maalgaliyo...” Hadaba, xadiga qofkiiba ee barnaamijka shaqaaleysiinta maktabada cusub, horumarinta buugta maktabada, iyo horumarinta kaydka ee kharshaadka buugta cusub iyo kuwa la badelaayo waa la qiyaasay.</p> <p>Tusaale kale, Hadafka 4:2A, “Helitaan loo siman yahay oo miisaaniyada maktabada dugsiga ah, oo ku saleysan baahiyaha bulshada ardeyda,” waxa loogu talagalay in “lagu horumariyo qaacidada maalgalinta laguna abuuro nidaamyada hubinta qeybsi khayraad loo siman yahay” (BPS Hadafka 4.2).</p>
<p>3. Falanqeynta Xogta <i>ogtee ayaa la falanqeyey?</i> <i>Miyya lagu kala saaray isir iyo kooxo kale oo muhiima? Maxay muujisay dhanka kala duwanaanshaha?</i></p>	<p>Agaasimaha Adeegyada Maktabada ayaa isbarbar dhigay heerarka qalinjabinta iyo heerar wareega kabuugta maktabada. Xogtu waxay muujisay in dugsiyada ugu qalinjabinta badan siiyaan ardeyda barnaamijyo waxtarleh oo maktabadeed. Hada, waxaanu wadnaa ururinta xog badan oo khuseysa khayraadka maktabada, iyo xiriirka ka dhaxeeya khayraadkan iyo arday kastoo dugsiga BPS deegaan ahaan iyo Fursadaha.</p>
<p>4. Kaqeybqaadashada Daneeyayaasha <i>Yaa ka qeybqaatay (tirada, kooxaha muhiimka ah, iyo doorarka) oo sidee, iyo maxay ayaa kasoo baxay? Maxay ardeyda/qoysaska ay saamaysay soojeedintan/dadaalkan ay yidhaahdeen?</i></p>	<p>Intii lagu jiray sanadkii hore, kooxda maktabada oo dhan ayaa ugu xirtay qaabab badan oo wakiilada daneeyayaashada — ardeyda, macalimiinta, bulshada dugsiga iyo qoysaska — si loo abuuro LSSP22 Kooxda Latalinta. Diseembar, kooxdu waxay dejisay siyaasadaha lagu fidinaayo helitaanka badqaba iyo meelo loo siman yahay oo maktabada dugsiga, waxayna abuureen aragtida waxa ay tahay in maktabada dugsiga siiso ardeydeena ugu baahida badan. Looxda Latalinta LSSP22 waxay isticmaashay qodobadan sare si u barato aragtida iyo rajooyinka barnaamijyada maktabada dugsiga. Xog-ururin ayaa ogeysiisay hadafyada LSSP22 iyo dadaalada muhiimka ah.</p>
<p>5. Siyaasadaha Sinaanta Isirka <i>Sideebaa soojeedintan/dadaalkan u yareeyey kala duwanaanshaha una kordhiyey sinaanta isirka? Waa maxay caqabadaha aan lagu talogalin ee macquulka ah? Siyaasadehee khasaba ee kor u sii qaadi kara sinaanta?</i></p>	<p>Siyaasadaha LSSP22 waxa ku jira kordhinta helitaan cadaalada oo ardeydu u hesho maktabada dugsiga; abuurida iyo fududaynta Baadhida Kala duwanaansha Kaydka; kulamo khubaro horumarineed oo loo maraayo Simmons University si loo siiyo wado cadeyn maktabada dugsiga ah; iyo bilaabida Adeegyada Maktabada BPS Gudida Latalinta oo ay ku jiraan ardeyda, macalimiinta iyo qoysaska.</p> <p>Dibu eegista waafaqsanaanta Nidaamyada AASL iyo macluumaadka ardeyga ee Awoodaha Akhriska iyo Qoraalka ee manhajka muhiimka ayaa sidoo kale la qorsheeyey, kaasoo u isticmaali doona Qalabka Qorsheynta Sinaanta Isirka tilmaam ahaan. Qodob kastoo LSSP22 waxa loogu talo galay baabita farqiga fursadaha iyo horumarinta sinaanta isirka. Caqabad aan lagu talogalin oo macquula ayaa keeni karta khayraad yaraan ardeyda mar horeba helay maktabada ardeyda barnamijyadeeda cusub ayaa lagu daray dugsiyada hada iyadoo bilaa maktabada ah.</p>
<p>6. Miisaaniyada & Hirgalinta <i>Waa maxay saameynta miisaaniyada? Sidee ayaa</i></p>	<p>Aragtida qorshuhu waa in dhamaan ardeydu helaan barnaamijyo waxtar leh oo maktabadeed. Qorshuhu wuxuu soo jeedinayaa ardeygiiba xadi buug cusub ah inuu ka helo maktabada, siyaasadaha cusub iyo kuwa loo baahan yahay ee maktabada hada. Waxa</p>

<p><i>hirgalintu u hubinaysaa in dhamaan ujeedooyinka, gaar ahan ujeedooyinka sinaanta, la buuxiyey? Waa maxay aqoonsiyada kooxda hirgalinta, oo miyey keeni karaan sinaan?</i></p>	<p>intaas dheer, inkastoon lagu darin qorshaha, ilaa 45 maktabadood oo cusub ama la cusbooneysiyeey ayaa lagu daray soojeedinta ESSER Reimagine miisaaniyadeeda. Maktabadahan cusub waxay u faa'idayn doonaan helitaan isku mida shaqaalaha maktabada, kaydka CLSP, iyo barnaamijka waxtarka leh ee maktabada dugsiga.</p> <p><i>Gudida Latalinta Adeegyada Maktabada BPS</i> waxay kormeeri doonaan hirgalinta qorshaha. Kooxdani waxa ku jiri doonaa ardeyda, macalimiinta, hogaamiyayaasha dugsiga, wakiilada qoyska iyo shuraakada bulshada, waxayna ka turjumi doonaan macluumaadka ardeyga BPS.</p>
<p>7. Isla-xisaabtanka & Xiriirka <i>Sideebaa saameynta loo qiimeyn doonaa, qori doonaa oo loo ogeysiin doonaa daneeyayaasha? Yaa ka masuul noqon doona?</i></p>	<p>Sida sare lagu xusay, Kooxda Maktabada BPS waxay horumarin doontaa <i>Kaydka Xogta Maktabada</i>. Xogta la ururiyey waxay ku dari doonaa inta jeer:</p> <ul style="list-style-type: none"> ● ardeydu buugta amaahatay, ● wakhti ee ardeydu isticmaashay maktabada si loo hubiyo buugta, ● ardeydu ka qeybnoqotay khayraadka maktabada mashaariicda waxbarashada, ● khayraadka dhijitaalka ah ee maktabada ardeydu heshay, iyo ● buugta lagu daray kaydka. <p>Jawaabcelinta barnaamijka maktabada waxa lagasoo ururin doonaa ardeyda, macalimiinta, hogaamiyayaasha dugsiga, qoysaska iyo shuraakada bulshada dugsiga. Qodobada xogtani waxay dhaqaajin doontaa hirgalinta qorshaha. Agaasimaha Adeegyada Maktabada ayaa isticmaali doonaa qorshaha iyo xogta lasoo ururiyey si uu u dejiyo hadafyada waxbarasho ee sanadka. Ku xigeenka Kormeeraha Waxbarashada ayaa dibu eegi doonaa hadafyada si loo hubuyo helitaan siman oo waxtarleh maktabadaha BPS, maktabada barashada wax dhigista, iyo khayraadka maktabada.</p>